Hayada Caafimaadka Columbus

Ogaysiis ilaalinta baraafisiga

Bilaabmaya April 14, 2003

Ogaysiiskani wuxuu sharaxayaa sida Hayada Caafimaadka ee Columbus ay u istmaali doonto infoormaashinkaaga caafimaad, ama ay ugu gudbin karto hayadaha kale. Waxay kaloo sheegaysaa inaad xaq u leedahay helitaanka infoormaashinkaaga adiga oo ka helaya Hayada Caafimaadka Columbus. Akhri akhbaarka hoosku qoran, hadaad su'aal qabtana fadlan wadii.

1. **Hayada Caafimaadka Columbus waxay ilaaninaysaa Infoormaashinkaaga caafimaad**: Infoormaashinka la ilaaninayo waxaa ku jiraa:
   - Xanuunadii hore, kuwa hada, kuwa mustaqbalkaba, iyo caafimaadka.
   - Xanaanadada caafimaad ee aad heshay
   - Kharashka Adeega caafimaadkaaga

   Sharcigu wuxuu dhigayaa, inaan:

(a) Inaanu ilaalino informaashinka caafimaad si ay u ahaato qarsoodi
(b) Inaanu raacno qarsoodida lagu sharaxay ogaysiiskan
(c) Inaanu la wadaagno-fasaxno infoormaashinka ugu yar, ama muhiimka ah.

Waxaanu xaq u leenahay inaanu waxka bedelo ilaalinta infoormashinka, iyo ogaysiiskanba. Hadii aanu waxka bedalo waxaanu ogaysiisku dhejin doonaa Health Commissioner's Office. Waxaad na waydiisan kartaa ogaysiiska cusub, ama waxaadka heli kartaa websiteka www.cmhhealth.org.

2. **Sidaanu u isticmaalo Infoormaashinkaaga Caafimaadka:**
   Sharcigu wuxuu dhigayaa Hayada Caafimaadka ee Columbus ay infoormaashinkaaga u isticmaali karto sababahan hoosku xusan:
   - Inay isticaamaalaan dhakhtaradu, Neersisku, ama Hayadaha caafimaadku ee kugu daawaynaya hayada Caafimaadka ee Columbus ama meelaha kale.
   - Inaanu helo kharashkii lagugu daaweeyey, tusaale ahaan Waxaanu siin karnaa infoormaashinkaaga Medicare ama Medicaid, Hayada caafimaadka ee Ohio ama Caymisyada kale si aanu lacagtayada u helno.
   - Si'aanu u hubino daryeelka aanu kusiinay waxaanu hubinaynaa barnaamij-yadayada.
   - Si'aanu kuu xasuusino balamahaaga/faa'iido waxaanu kuusoo diraynaa xasuusin, ayku lifaaqan tahay informaashinkaagu. Waxaad noo sheegi kartaa hadii aadan rabin inaad heshid.

3 Waanu wadaagi karnaa infoormaashinkaaga caafimaad markaad ogolaanshahaaga markii:
   - Markaa saxeexdid warqad ogolaansho ah, waad joojin kartaa ogolaanshan markasta adiga oo qoraal kusoo gudbinaya.

4. Waxaanu bixin karnaa Informaashinkaaga caafimaad adigoon ogalaansshiiyo na siin hadii:

- Haday jirto Dayacad, dulmid, rabsho ama shari ku xad gudub
- Hadii maxkamadi xukuntay.
- Haday noqoto inaanu hubino shaqadana aanu qbanayno inay sax tahay.
- Haday noqoto inaanu warbixin ku saabsan xanuun, ama jirooyin, in loo sheego dhimasho, ama dhalasho daryeelayaasha kale ee caafimaadka.
- Haday noqoto inaanu warbixin siino hayadaha baadha dhimashada iyo xanuunada aan cadiga ahayn.
- Haday noqoto inaanu infoormaashin la wadaagno qolyaha dadka aasa, ama dhakhtarka dhimasha u qabilsan, hadii aad dhimato timadana hayadaha u qaabilsan dhiig bixinta, iyo waaxyaha jidka ee lagu deeqo.
- Waxaanu u baahanay inaan informaashin siino askarta, maxaabiista, ama militeriga, etc. Hadii khatari ku timaado nabada iyo caafimaadkaba.

5. Waxaad diidi kartaa inaad infoormaashinkaaga wadaagtid:

Hadii aadan doonayn inaad infoormaashinkaaga bixin, waa inaad qoraal ahaan ku sheegtaa. Ogowse tani waxay xadidaysaa in caafimaad daryeelayaasha kale ku daaweeyaan. Hadii aad xanuun badani ku hayo waa laga yabaa inaadan odhan karin, “Maya.” Hadayse suurto gal tahay, waxaa lagu siin karaa goorasho aad ku tidhaahdo “Maya” qoraal ahaan.

6. Waxaad leedahay xaquuq kale:

- Waxaad na waydiin kartaa inaanu yarayno istimaalida infoormaashinkaaga caafimaad. Khasab naguma aha inaan kaa yeelo. Hadii aanu kugu adeecno, waxaanu kugu ogoysiinaynaa qoraal ahaan, waanuna raacaynaa codsigaaga, hadii aanay arin deg degi jirin. Ama hadii askarta ama maxkamadi, ama dawladi aanay na waydiisan infoormaashinkaaga. Ma yeelayno codsigaaga hadii aad kasoo hor jeedo sharciga. Waad joojin kartaa xanibaadan, ama hakintan, adiga oo afka nooga sheegi kara.
- Noo sheeg, iyo sida laguulasoo xidhiidhoba. Waan isku dayaynaa inaanu codsigaaga fulino intii awoodayada ah.
- Na waydoo inaanu dib u qiyaasno, infoormaashinkaaga. Waa inaad codsigaa noogusoo gudbisaa qoraal ahaan. Waxaan kuugusoo jawaabaynaa 30 maalmood gudahood iyo inka yarba. Hadaanu ku nidhaahno dib uma qiyaasi karno, sababta waxaanu kuugusoo gudbin qoraal ahaan. Waxaad na waydiisan kartaa inaanu codsigaaga dib u fiirino. Waxaad kaloo xaq u leedahay inaad infoormaashinkaaga aragtid, ilaa iyo inta aanu hayno.
- Waxaad waydiidan kartaa infoormashinkaaga caafimaad in lagu siiyo koobiyo. Waxaa laga yaabaa inay lacag kugu kacdo. Waa inaad noo dheegtaa waxaad doonayso in laguu koobigareeyo. Kuguma kacayso inka badan

$2.83 xaanshi kasta, ilaa’iyo 10 ugu horeeya;

Hayada Caafimaadka Columbus

Ogaysiis ilaalinta baraafisiga
Bilaabmaya April 14, 2003

59 cents, bajajka 11-50.
24 Cents, baje 51 iyo wixii kasareeya.

- Naga codso, qoraal ahaan inaanu saxno ama ku daro Informaashinkaaga caafimaad, hadii aan u qabtid in waxka khaldan yihiin, ama waxka maqan yihiin. Waanu kuusoo jawaabaynaa 60maalmood gudahood. Waxaa laga yaabaa inaanu nidhaahno, “Maya”hadii aanu u aragno, in infoormaashankaaga caafimaadku.

a) Saxyahay ama dhamaystiran yahay
b) Ka yimid hayadkale oo aan ahayn Hayada Caafimaadka ee Columbus
c) Haduu maqan yahay
d) Adigu ma bedeli kartid

Waanu kuu sheegi doonaa sababta aadan u bedeli karin Infoormashinka caafimaadkaaga. Waanuna kuu sheegi doonaa sida codsigaaga aad u bedeli karto. Hadaanu ogolaano in Infoormaashinkaaga caafimaadkaagu khaldan yahay, waanu bedeli doonaa. Waanuna kusoo ogaysiin doonaa adiga iyo dadka u baahan inay ogaadaanba bedelaada.

- Waxaad na waydiin kartaa inaanu masuulka noqona cidaanu infoormaashankaaga siino, waanuna kuu sheegi doonaa:
  a) Cidaanu infoormaashinka la wadaagnay
  b) Waxaanu la wadaagnay
  c) Markaanu la wadaagnay iyo
  d) Sababta aanu u bixinay

  Waanu kuu sheegi doonaa macluumaadkan qoraal ahaan (Daabacid, ama elektaroonikli) 60 maalmood gudahood.oo ka bilaabanta maalinta aanu codsigaaga helno. Lacagkuguma aha hadaad sanadkiiba hal codsi soo gudbisid. Waxaanu infoormaashankaa ku siin doonaa ilaa iyo 6 sano, kana bilaabanta ka dib April 13, 2003.

7. <u>Waxaad gudbin kartaa dacwad</u>:
   Hadaad aaminsan tahay inaanu khalad samaynay daryeelka infoormashinka caafimadkaaga waxaad waxaad ogaysiin kartaa qoraal ahaan anaga, ama U>S Deparment of Health and Human Services at HHS Privacy Advacate John Fanning, HHH Bldg.., Room 440-D, Washington, D.C 20120.

8. <u>Qofka lagala xidhiidho Hayada Caafimaadka Columbus</u>:

   Hadii aad su’aal qabto ku saabsan Ogaysiiska Qarsoodiga, ama wixii dacwo ah ee ku saabsan habka aanu u daryeelo infoormaashinkaaga caafimad, fadlan la xidhiidh Health Commissioner, Columbus Health Department, 240 Parsons Avenue, Columbus, OH 43215.